# Qardajeexa ilkaha ee Vegemi

Vegemi waa bakteeri yar oo wanaagsan oo ku nool calooshaada. Wuxuu jecel yahay inuu ku qardajeexo gudahaaga isaga iyo saaxiibbadiis. Caawa Vegemi wuxuu ugu baxayaa qardajeex ADIGA afkaaga! Afkaaga waxaa ku nool bakteeriyo badan oo afka ah: qaar xun, qaar wanaagsan. Bakteeriyada wanaagsan waxay daryeelaan afkaaga. Bakteeriyada xun waa in si taxaddar leh loo cadayaa!

Vegemi wuxuu salaamaa bakteeriyada wanaagsan wuxuuna eegaa hareeraha. Hortiisa waxaa ka kacaya Buuraha Ilkaha: "WAAW! Halkan waxaa yaal ilko aad u qurux badan!" ayuu Vegemi la yaabaa.





Waa waqtigii cunto fududda fiidkii**.** ADIGA waxaad cunaysaa rooti, farmaajo, rediisyo iyo xabbado karootada. Vegemi wuxuu dareemayaa sida Buuraha Ilkaha u dhaqaaqayaan. Khudaartu waa adag tahay waxayna u baahan yihiin calalin. ROUSK!

Markaad calaliso, daankaaga iyo ilkahaagu way xoogaystaan. "Cuntadan fiidkii ee macaan waxaan ka helaynaa ilko xooggan iyo awoodda super-ka ee dhoolla-caddayn dhalaalaysa!", ayay ku qaylinayaan. Vegemi iyo bakteeriyada wanaagsan ee afka waxay jecel yihiin cunto caafimaad leh. Laakiin bakteeriyada xun gebi ahaanba ma jecla cuntada caafimaadka leh.

Dhaqdhaqaaqa Buuraha Ilkaha wuu istaagaa waxaana noqda mid deggan. Markaas waxaa afkaaga soo gala hir weyn oo biyo ah. HUIII! Vegemi iyo saaxiibbadiis waxay ku dabaashaan biyaha dhexdiisa waxayna dheggan yihiin darbiyada Buuraha Ilkaha. Vegemi waa faraxsan yahay gebi ahaanna waa qoyan yahay.

Biyuhu waa cabitaanka ugu fiican! Waxay dhaqaayaan ilkaha waxayna kordhiyaan candhuufta. Sidaas ayay afkaagu u caafimaadaa. "Afkuna waa inuu sidoo kale helo nasasho. Habeenkii waxaa la cabbaa oo keliya biyo!" ayuu Vegemi xasuusinayaa. Sidoo kale maalintii afku waa inuu helo nasasho inta u dhexeysa cuntada. Sidaas ayay ilkaha u sii ahaanayaan kuwo xooggan, ayuu Vegemi ogyahay.





Vegemi iyo saaxiibbadiis waxay ku fadhiyaan Buuraha Ilkaha iyagoo wada sheekeysanaya. Waxay ka leexdaan marka burush weyn yimaado si uu u nadiifiyo AFKAAGA! Marka hore waxaa la cadayaa dusha gudaha ee ilkaha dambe, ka dib dusha dibadda ugu dambeyntiina dusha calalinta. SUIH SUIH!

Qofka weyn ayaa si taxaddar leh u cadaya ILKAHAAGA, laba daqiiqo mar kasta, subaxii iyo fiidkii. Bax bakteeriyada xun: burushku wuxuu nadiifiyaa god kasta oo Buuraha Ilkaha ah, hoos iyo kor. Hadda Buuraha Ilkaha way dhalaalayaan hawaduna waxay u muuqataa mid nadiif ah. Vegemi-na wuu daalay. Waa fiican tahay in la seexdo afka oo nadiif ah lana siiyo afka nasasho habeenka oo dhan!

TAMPERE
Tampereen ammattikorkeakoulu
Vegemi
Euroopan unionin osarahoittama
Pirkanmaan hyvinvointialue
Niitty2